

Sida loogu codeeyo waraqadda cod-bixinta maqnaanshaha

Waxaad u baahanaysaa:

- Warqadda cod-bixinta*
 - Baqshadda huruudda ah ee warqadda cod-bixinta*
 - Arjiga diiwaangelinta cod-bixiyaha*
 - Baqshadda cad ee saxiixa*
 - Warqadda cad ee balaaran ee la soo celinayo*
 - Qalin khad madow
 - Shatiga darawalka Minnesota oo cinwaankaaga leh ama wax kale oo sharci ah cadaynayana meesha aad deggan tahay. *Dhinaca kale ka eeg liiska waxyaabo aad kala dooran karto*
- *Haddii waxyaalahaas midkood kaa maqan yahay, fadlan la xiriir shaqaalaha doorashada ee xaafaddaada.
- Lambarka Warqaddaada Aqoonsiga (WA) Shatiga darawalka Minnesota, lambarka WA ee Minnesota, ama afarta lambar ee ugu dambeeya Sooshaal Sikuuradkaaga. *Hoos eeg haddii aadan haysan lambaradaan midkoodna.*
 - Markhaati Qof kasta oo diiwaangashan in uu ka codeeyo Minnesota, oo uu ka mid yahay/tahay saygaaga/xaaskaaga ama qof qaraabo ah, ama nootaayada bulshada, ama qof u idman in uu dadka dhaariyo

Muhiim: Si codkaaga loo tiriyo waa inaad arjiga diiwaangelinta cod-bixiyaha iyo warqaddaada-cod-bixinta ku wada keentaa (baqshadda cad ee saxiixa gudaheeda).

1 Buuxi arjiga diiwaangelinta cod-bixiyaha saxiixna

- Tus qofka markhaatiga kuu ah shatigaaga darawalka ama wax kale oo ah sharci cadaynayana meesha aad deggan tahay. *Dhinaca kale ka eeg liiska waxyaabo aad kala dooran karto*

2 Codee!

- Tus qofka markhaatiga kuu ah warqadda cod-bixinta oo aan waxba ku qornayn, markaa ka dib si qarsoodi ah u calaamadee codkaaga.
- Raac tilmaan-bixinta ku qoran waraqadda cod-bixinta.
- Magacaaga ama lambarka Warqaddaada Aqoonsiga meelna hakaga qorin warqarqadda cod-bixinta.
- Ha u codayn musharixiin ka badan inta la ogol yahay. *Haddii aad sidaan samayso, codkaaga xafiskaas lama tirinayo.*

Haddii aad qalad samayso, eeg dhinaca kale ee waraqadda cod-bixinta.

3 Warqaddaada cod-bixinta ku rid oo ku xir baqshadda huruudda ah.

- Waxba haku qorin baqshadan dusheeda.

4 Baqshadda huruudda ah iyo arjiga diiwaangelinta cod-bixiyaha ku dhex rid baqshadda cad ee saxiixa.

5 Buuxi dhammaan baqshadda cad ee saxiixa.

- Haddii aysan jirin calaamad ku dhegan, si fasiix ah u qor magacaaga iyo cinwaankaaga Minnesota.
- Si fasiix ah u qor lambarka shatigaaga darawalka Minnesota, lambarka Warqaddaada Aqoonsiga ee Minnesota, ama afarta lambar ee ugu dambeeya Sooshaal Sikuuradkaaga. **Hubi in aad ku qorto mid ka mid ah isla lambaradii aad ku qortay codsigaagii waraqadda cod-bixinta maqnaanshaha.** *Haddii aadan lahayn lambaradaan midkoodna, Calaamadee sanduuqa.*
- Akhri oo saxiix dhaarta.
- Waydii qofka markhaatiga kuu ah in uu magaciisa iyo cinwaankiisa wadada ee Minnesota si fasiix ah u qoro (ma aha P.O.Box), iyo in uu magaciisa saxiixo. *Haddii qofka markhaatiga kuu ah uu yahay shaqaale ama nootaayo, waa in uu si fasiix ah u qoraa jagadiisa halkii uu ka qori lahaa cinwaankiisa. Nootaayoyinka waxaa waajib ku ah in ay shabadeeyaan.*
- Xir baqshadda.

6 Si macluumaadkaaga asturan aad uga ilaaliso in la arko, baqshadda saxiixa ku rid baqshadda cad ee balaaran ee la soo celinayo.

- Xir baqshadda.

7 Waraqaddaada cod-bixinta ku soo celi cinwaanka ku yaal baqshadda la soo celinaayo ugu dambayn Maalinta Doorashada.








Warqadaha cod-bixinta lama gayn karo goobtaada cod-bixinta.

Saddex qaab ayaad kala dooran kartaa:

- Soo dir si ay u timaado maalinta doorashada, adiga oo isticmaalaya boostada Maraykanka ama adeeg alaabooyinka la isugu diro,
- Adigu gay ka hor maalinta doorashada ama ugu dambayn 3:00 galabnimo ee Maalinta Doorashada, ama
- Qof ka codso in uu kaa geeyo ugu dambayn 3:00 galabnimo ee Maalinta Doorashada. *Qofkani ma keeni karo in ka badan 3 waraaqaha cod-bixinta ah.*

Si aad u ogaato xaaladda warqaddaada cod-bixinta maqnaanshaha, booqo

www.mnvotes.org.



Waxyaabo kala duwan oo aad ku caddayn karto meesha aad deggan tahay

Shatiga darawalka Minnesota oo aan dhicin, Warqadda Aqoonsiga (WA) Minnesota oo muujinaysa cinwaankaaga hadda ama

WA oo sawir leh oo aan cinwaankaaga hadda aanu ku oolayn oo ay la socoto dukumiinti cinwaankaaga hadda uu ku yaal

Warqadaha Aqoonsiga sawirka leh ee la aqbalayo: Shatiga darawalka ee Minnesota ama gobol kale, ruqsadda dareewal barashada, ama Warqad Aqoonsi (WA); baasaboora Maraykan; WA ee ciidanka Maraykanka ama Warqadda Aqoonsiga ee ciidamadii hore; WA Minnesota ee dugsi sare/kuleejo/jaamicad; ama WA qabiil oo saxiixaaga leh, kana timid qabiil ay aqoonsantahay Bureau of Indian Affairs (BIA).


- **Dukumiintiga cinwaankaaga hadda leh ee la aqbalayo:** qaan sheeg asal ah, bayaanka koontadaada iyo ogaysiis adeeg bilaabid, taariikhdiisuna tahay ka hor 30 maalmood gudahood ama waqtigoodu ku egyahay 30 maalmood ka hor ama ka dib doorashada; caddayn kharajka ardayga oo hadda ah; ama heshiis ijaar guri oo aan dhacsanayn maalinta doorashada. Qaansheegyada la aqbalayo waa: gaaska, korontada, qashinka, biyaha, bulaacadda, taleefoonka, moobiilka, taleefishanka, internetka, kaarka daynta, ama adeegyada bangi; ama qaansheeyo ijaar ama bixin deynta guryaha lagu gato.

ama mid ka mid ah kuwan soo socda:

- Rasiid jaale ah oo muujinaya Shatiga darawalka Minnesota oo aan dhicin, Warqadda Aqoonsiga (WA) Minnesota oo muujinaysa cinwaankaaga hadda, ama ruqsad muujinaysa cinwaankaaga hadda
- Damaanad-qaad: saxiixa codeeye diiwaangashan degganna xaafaddaada oo yaqaan in aad xaafadda deggan tahay. Haddii qofka markhaatiga kuu ahi yahay codeeye ka diiwaangashan xaafaddaan, qofka markhaatiga kuu ahi wuu ku damiinan karaa.
Qofkani waa in uu buuxiyaa saxiixaana foomka damaanad-qaadka oo aad ka helayso dhinaca dambe ee arjiga diiwaangelinta cod-bixiyaha.
- Warqadda Aqoonsiga ee qabiil oo leh magacaaga, cinwaankaaga, saxiixaaga, iyo sawir, kana timid qabiil ay aqoonsantahay hay'adda BIA.
- "Ogaysiis Isdiiwaangelin Daahday" (Caddayn in aad isdiiwaangelisay waqti dambe) haddii aad ogaysiiskaas ka heshay hubiyaha degmada ama diiwaan hayaha magaalada
- Haddii aad xaafaddaada dhexdeeda meel u guurtay ama magacaaga bedeshay, isdiiwaangelin cusub ee xaafadda
- Damaanad-qaad dadka deggan xarumaha la deggan yahay qaarkood: saxiixa shaqaalaha xarunta aad deggan tahay, oo ay ka mid yihiin rugaha xanaanada waayeelka, guryaha kooxaha, hoyga haweenka la garaacay ama la dilay, iwm. Haddii aadan hubin in xarunta aad deggan tahay ay u qalanto, wac shaqaalaha doorashada ee xaafaddaada.
Qofka shaqaalaha ahi waa in uu buuxiyaa saxiixaana foomka damaanad-qaadka oo aad ka helayso dhinaca dambe ee arjiga diiwaangelinta cod-bixiyaha.

Qalad sixid

- Haddii waqtigu kuu saamaxayo, waydiiso xafiiskaaga doorashada warqad cod-bixin cusub. Ama,
- Si buuxda istalaab u mari magaca musharaxa aad sida qaladka ah u calaamadaysay markaa ka dib warqadaada cod-bixinta calaamaday musharaxa aad dooranaysa (magacaaga ama xarafka uu ka bilawdo ha ku qorin meelaha aad saxday).



Haddii aad naafo tahay:

Haddii aad naafo tahay ama aadan calaamadayn karin warqaddaada cod-bixinta, qofka markhaatiga kuu ah ayaa warqaddaada cod-bixinta kugu caawin kara in uu kuu calaamadeeyo iyada oo uu raacayo waxa aad rabto, in uu alaabta isugu kaa hagaajiyo, uuna kuu buuxiyo foomamka.

Marka aad saxiixayso baqshadda, sharciga Minnesota wuxuu oranayaa waxaad samayn kartaa:

- Adiga laftaadu saxiix baqshadda la soo celinayo, ama
- Calaamadee, ama
- Ka codso qofka markhaatiga kuu ah in uu kuu saxiixo adiga oo jooga. (Qofka markhaatiga kuu ah waa in uu isaguna magiciisa ku saxiixaa.)
- Haddii shabadi saxiixaaga tahay oo aad dhammaan wixii aad saxiixayso u isticmaasho, waxaad isticmaali kartaa shabaddaada saxiixa ama waxaad ka codsan kartaa qofka markhaatiga kuu ah in uu isticmaalo shabaddaada saxiixa adiga oo jooga.

Sharciga Minnesota, qaybta 645.44, qayb- hoosaad 14

Fadlan ogow: Cod-bixitu ma hoostagto awoodda wakiilnimida. Qofka haysta awoodda wakiilnimida waxaa kaliya oo uu kuu saxiixi karaa adiga oo jooga, sida kor lagu qeexay.

Ogaysiiska Qarsoodiga: Haddii warqaddaada codbixinta la aqbalo, magacaaga iyo cinwaankaagu waa kuwo u furan dadweynaha markii aqbalaadu dhacdo, marka loo adeegsado doorashooyinka, siyaasadda iyo ujeedooyin nabad sugid. Haddii kale, macluumaadka aad ku sheegtay baqshadda aad saxiixday waxay ku egtahay saraakiisha doorashada ilaa 8da fiidnimo ee Maalinta Doorashada. Waqtigaa wixii ka dambeeya, baqshaddaada iyo macluumaadka ku qoran, aan ahayn lambarkaaga aqoonsiga waa macluumaadka dadwaynaha. Lambarka aqoonsigaaga waxaa loogu baahan yahay in la hubiyo in warqadda codbixintu ay tahay isla middii uu soo celiyay codbixiyaha codsaday. Waad diidi kartaa in aad sheegto lambarka, laakiin waxaa suurtagal ah in codbixinta maqan lagu diido, ayna kaa hor istaagto in aad internetka ka ogaatid meesha ay marayso warqaddaada codbixinta maqanaha.